

Amar L. 12 rep

Xeerarka ku saabsan la wareegida hantida maguurtada iyo xuquuqda la xiriira sababaha danta guud awgeed.

MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA

MAAMULAHA

Kadib marki la arkay qodobka lamba. 4 ee dekreetada lamba. 2357 Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 9 Disember;

Kadib markii la arkay faqradda 3 ee qodobka 9 ee Dekreetada sare ku xusan;

Kadib markii laga tanasulay aragtida Guddonka Dalka ee baahida jirta in la bixiyo;

Kadib markii la arkay kay qod. 8 ee Heshiiska Maamulka.

Waxaa la go'aamiyey lana amray

Amar-Sharci

Qod. 1

Waxaa lala wareegi karaa hantida maguurtada iyo xuquuqda la xiriirta iyado dekreeto ay Hey'ada dowliga ee qaabilsan ay soo sarto si loogu fuliyo howlaha danta guud sida dhismaha, wax ka beddelka iyo isticmaalkooda.

Qod. 2

Waxaa loo yaqaana howlaha danta guud kuwa lagu fuliyo oo keliya danta Maamulka Dhexe, kuwa Gobollada, kuwa Degmooyinka, kuwa Maamulka Dowladaha Hoose ee Muqdisho iyo Adeegyada Dowladda Hoose ee goobaha ay ka dhisan yihiin.

Waxaa kale oo dan guud ah adeegyaha toos u xanaaneynaaya kobcinta taariikhda, sugganta, iyo dhaqanka Dalka uu leeyahay.

Qod. 3

Waxaa awoodda la wareegidda dan guud iska leh Guddomiyaha Gobolka. Waxaana uu soo saari doonaa dekreeto ay ku qoran yihiin tilmaamaha gaarka ee hantida lala wareegay.

Qod. 4

Qoraalka lagu caddeyey la wareegida dan guud waxaa lagu daabici doona Faafinta Rasmiga ah.

Qorshaha la wareegidda waxaa lagu keydin doona Xafiiska Maamulka Dowladda Hoose oo laga fulin doono howsha guud. Haddii fulinta howsha danta guud ay ka dhexeysa aagag badan waxaa lagu keydin doona xafiis kasta oo qaabilsan.

Keydka, goobta iyo muddada iyo ahmiyadda laga leeyahay waxaa lagu war gelin doona Guddomiyaha Degmada si guud ahaan ah iyado la isticmaalayo aaladaha ku habbon ogeysiska. Waxaa u xilsaan isla hey'addasi in ay ku dhejiso ogeysiis qoraal ah Dowladda Hoose iyo in ay ku soo daabacdo Faafinta Rasmiga ah ee Somaliya isla markiiba.

Ciddii doneysa in ay hor istaago bandhigga ogeysiiska la wareegidda danta guud awgee waxay u soo dacwoo karta 30 beri gudahooda Guddomiyaha Gobolka, kaas oo leh awood in uu go'aan ku garo dekreeto muddo 15 beri gudahooda.

Waxaa furan in rafcaan laga qaato go'aanka Guddomiyaha Gobolka muddo 15 beri gudahooda kas oo Maamulaha Guud oo go'aan kama dambeys ka gaari doono muddo 20 beri gudahooda.

Qod. 5

Magdhawga hantida lala wareeg dan guud awgeed waxaa tilmaami doonon kadib markii uu Guddomiyaha Gobolka codsado, Guddi uu Maamuluh magacaabo oo ka kooban: Garsooraha Somaliya oo haaya guddoonka, sarkaal ka tirsan Howlaha Guud, sarkaal ka tirsan Xafiiska Teknika ee Dhulka, laba la-taliyeyaal ee Maamulka Dowladda Hoose ee Muqdisho oo uu soo magacaabo Guddomiyaha Dowladda Hoose.

Guddigaa waa midka keliya ee ka jira dalka oo idil, saldhigiisana waa Muqdisho Waxaay go'aankudu ku gaaran hal dheeri, haddii ay is bar bar dhaco codka Guddomiya ay kala reebi doono. Haddii loo bahdo waxay u yeeran karaan khabiir ku xeel dheer hantida laga wareegay waxaayna dhageysan doonaa ciddii ka soo horjeeda Go'aanka Guddiga waxaa laga qaadan karaa rafcaan ilaa iyo 15 beri gudahooda maalintii la soo gaarsiyey go'aanka oo loo soo qorto Maamulaha, kaas oo go'aan kama dambeys ah riddi doono isla muddada sare ku xusan oo kale Wixii kharaj ah ee khabiiraha ama Guddiga waxaa bixin doonto ciddii la wareegtay hantida.

Qod. 6

Go'aanadda la wareegidda dan guud iyo qorshaha a wareegidaada iyo magdhawga la carifay markii ay rasmi noqdaan, Guddomiyaha Gobolku wuxuu ku soo bandhigi doona dekreeto iyadoo amraaya la wareegidda, bixinta magdhawga iyo gunnoyinka iyo degista hantida lala wareegay.

Qod. 7

Haddii ay jiraan marxalado qatar oo dan guud qasbaayo, Guddomiyaha Gobolka isago ka haysata oggolansho Maamulaha wuxuu si toos ah soo saari karaa dekreeto sababeysan ee la wareegidda hantida lagu carifay qodobka 1, iyadoo loo mareeyn qaababka sharcigaan dhigayo, iyadoo la dhigo magdhawga Bangiga, qorshaha la wareegidda lagu keydiyo Xafiiska Dowladda Hoose. Waxaa la oggol yahay, in lagu dabaqo codsiga magdhawga sida ku cad faqradda 4aad ee qodobka 5.

Muqdisho, 23 Maayo 1955.

Xoghayaha Guud

Franca